

TILMAAMO LOOGU TALAGALAY QOYSASKA

Ku Caawi Ilmahaaga Barashada Akhrinta

Macillimiinta ilmahaaga si dadaal badan ayey u shaqeenayaan si ay u baraan wax akhrinta. Waxaa jira waxyaabo badan oo aad ku sameyn karto guriga oo sidoo kale caawini kara. Waa kuwan qaar fikrado ah si ay kugu caawiyaan bilaabida.

1

Kula hadal ilmahaaga luqada wadankaaga.

Caruurta waxay awoodaan inay ku bartaan luqado badan hal wakhti. Isticmaalida luqada wadankaaga ma jah-wareerin doono, xitaa haddii ay ku hadlaan afka Ingiriisiga!

2

U sheeg ilmahaaga faa'iidada ahaanta qof labo luqadood ku hadla:

- xiriir adag ee lala lahaado qoyska iyo dhaqanka
- fursado waxbarasho, mustaqbal shaqo, iyo safar oo sii badan
- faa'iido u ah maskaxda nolasha oo dhan

3

La wadaag sheekooyinka iyo heesaha dhaqankaaga.

Ilmaha waxay jecel yihiin sheekooyinka! La wadaag sheekooyinka qoyska sidoo kale heesaha, ciyaaraha, iyo codadka muusikada ee yaraantaadii.

4

La wadaag caadooyinka iyo hab-cunto u sameynta gaarka u ah wadankaaga.

Ka hadal caadooyinka muhiimka ah ee dhaqankaaga oo dooro qaar hab-cunto karis si aad si wadajir ah isula diyaarisaan.

5

Kala hadal ilmahaaga wax la kulanka maalintooda.

Weydii inay kuu sheegaan wax ay ku farxeen, wax ay u arkeen inuu adag yahay, ama wax ay barten.

6

Ku dhiirigeli ilmahaaga inay wax qoraan maalin walba.

Weydii ilmahaaga inay kugu caawiyaan qorida liistada adeega guriga ama fariin loo qorayo qof qaraabo ah. Waxay ku qori karaan fariin qoraal ah taleefankaaga, imayl ku qoraan kumbuyuutarka, ama fariin gacanta lagu qoray warqad.

7

Dhageyso ilmahaaga iyagoo kor wax u akhrinayo.

Waydii ilmahaaga inay wax kaaga akhriyaan buug, taleefankaaga gacanta, ama qoraalada ku qoran alaabta adeega guriga.

8

Haddii aad leedahay adeega Internetka waxaa kari kartaa:

- is diiwaan geli si aad u hesho kaarka maktabada si aad u soo dajisato buugaag elektrooni ah
- Raadi websadyada, fiidiyowyo iyo barnaamijyo (apps) waxbarasho

